# خطورة الشائعات وتزييف الوعي
# Halista kutirikuteenka iyo habaabinta wacyiga

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:
{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَقُولُوا قَوْلًا سَدِيدًا * يُصْلِحْ لَكُمْ أَعْمَالَكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَمَنْ يُطِعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ فَازَ فَوْزًا عَظِيمًا}،

**(Kuwa (xaqa) rumeeyoow ka dhawrsada Alle hadal toosanna ku hadla * haydiin wanaajiyo camalkiinna hana idiin dhaafo dambigiinee, ruuxii adeeca Alle iyo rasuulkiisa wuxuu u liibaanay dhab ahaan liibaan weyn)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Loollanka u dhexeeya xaqqa iyo baadilka waa loollan soo jiray inta ay dadka soo jireen, wuuna jiri doonaa inta Ilaahay ka dhaxlayo dhulka iyo waxa saaran, waxaa ugu muhimsan dadka baadilka wato oo ay kula dagaallamaan dadka xaqqa wato waa abuurista kutirikuteenka iyo ku dhex faafinta dadka dhexdooda.

Waxaan shaki ku jirin kalmadda inay tahay amaano iyo mas'uuliyad weyn, ha ahaato midda la akhristo ama midda la dhegeysto ama midda la daawado, kutirikuteenka waa ereyo ku dhex faafo dadka, oo uu soo tabiyo qof qablbiga ka jirran ama hay'ad ama urur oo ka mid ah sharwadeyaasha oo u shaqeeya si qarsoodi ah markaas dadka ayaa sii faafinaya iyagoon hubsanin marka dadka caqligooda iyo naftooda ayaa dhib kala kulmaya, waxay faafinayaan fikradaha wax dumiya iyo caqiidooyinka hallaysan, bulshada waxay galaysaa walwal iyo shaki, amnigana waa ka tagayaa, kalsoonida dadka dhexdoodana way yaraanaysaa, waxaad arkaysaa ummad hal ah oo qaarkooda qaarka kale shaki galinaya oo iskhiyaanaya sidaas awgeed wuxuu yiri nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(كَفَى بِالْمَرْءِ كَذِبًا أَنْ يُحَدِّثَ بِكُلِّ مَا سَمِعَ)**

(**Qofka waxaa ku filan been inuu sheego waxkastoo uu maqlo**)

Haddii ay tahay ka sheekeynta wax walba uu qofka maqlayo nooc ka mid ah beenta oo qofka lagu ciqaabayo ciqaab daran aakhiro maxaad u malaynayasaa qofka sheegayo wax uusan arkin ama uusan maqlin?.

Islaamka mowqif adag ayuu ka qaatay kutirikuteenka iyo dadka faafiya, wuxuu ku tiriyay inuu yahay dhaqanka akhlaaqda wanaagsan kasoo horjeeda, iyo qiyamta fiican ee shareecada islaamka ay la timid waa markuu

islaamka amray dadka raacsan inay ka ilaaliyaan carrabka wax kastoo fidna keenaya oo qas ku kicinaya bulshada, wuxuu amray inay run sheegaan carrabkoodna ilaaliyaan, inay hubsadaan wax kastoo maqalkooda soo gaaraya sideysan ugu noqonin sabab faafinta fidnooyinka iyo hallaynta bulshada iyo foolxumeynta sharafta, wuxuu yiri Alle:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَكُونُوا مَعَ الصَّادِقِينَ}

(**Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada Alle noqdana kuwa la jira runlowyaasha**), wuxuu yiri Alle:

{مَا يَلْفِظُ مِنْ قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عَتِيدٌ}

(**Kuma hadlo oraah hadday dhacdana waxaa la jooga Raqiib iyo Catiid (oo qori**).)

Wuxuu yiri Alle subxaanahu:

**{وَلَا تَقْفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ إِنَّ السَّمْعَ وَالْبَصَرَ وَالْفُؤَادَ كُلُّ أُولَئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْئُولًا}**

(**Hana raacraacin waxaadan cilmi u lahayn, Illeen maqalka, aragga iyo qalbigaba waa lays warsane**)

Waxaa ku sugan xadiiska Mucaad bin Jabal – Ilaahay raalli haka noqdee - markuu nabiga u caddeeyay waajibaadka islaamka iyo albaabada khayrka, wuxuu ku yiri:

**(وَإِنْ شِئْتَ أَنْبَأْتُكَ بِرَأْسِ الْأَمْرِ وَعَمُودِهِ وَذُرْوَةِ سَنَامِهِ) ، قَالَ معاذ : أَجَلْ يَا رَسُولَ اللَّهِ. قَالَ : (أَمَّا رَأْسُ الْأَمْرِ فَالْإِسْلَامُ ، وَأَمَّا عَمُودُهُ فَالصَّلَاةُ ، وَأَمَّا ذِرْوَةُ سَنَامِهِ فَالْجِهَادُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ، وَإِنْ شِئْتَ أَنْبَأْتُكَ بِمِلَاكِ ذَلِكَ كُلِّهِ) ،**

**فقَالَ: مَا هُوَ يَا رَسُولَ اللَّهِ؟ قَالَ: (فَأَهْوَى بِإِصْبَعِهِ إِلَى فِيهِ) ، قَالَ: فَقُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ، وَإِنَّا لَنُؤَاخَذُ بِمَا نَقُولُ بِأَلْسِنَتِنَا؟ قَالَ: (ثَكِلَتْكَ أُمُّكَ، هَلْ يَكُبُّ النَّاسَ عَلَى مَنَاخِرِهِمْ فِي جَهَنَّمَ إِلَّا حَصَائِدُ أَلْسِنَتِهِمْ؟)** .

(**Haddaad rabto waxaan kuu sheegayaa arrinka madaxiisa iyo tiirkiisa iyo meeshiisa sare**) wuxuu yiri Mucaad: waa yahay rasuulkii allow, wuxuu yiri: (**arrinka madixiisa waa islaamka tiirkiisana waa salaadda meeshiisa sarena waa jihaadka dar Alle, haddaad rabto waxaan kuu sheegaa arrinkaas oo dhan waxa lagu hanan karo**) wuxuu yiri: muxuu yahay rasuulkii allow? , wuxuu yiri: (fartiisa ayuu afkiisa aaddiyay) wuxuu yiri: waxaan ku iri: rasuulkii allow ma waxaan dhahayno miyaa lanagu qabsadaa? wuxuu yiri: (**hooyadaa haku weysee miyuu dadka sankooda ugu tuurayaa Jahannmo waxaan ahayn carrabkooda wuxuu u keeno mooyee**).

faafinta kutirikuteenka waa dhaqanka munaafuqiinta si ay ugu gaaraan danahooda iyo ujeeddooyinkooda khalkhalinta amaanka iyo beegsashada midnimada dalka iyo daciifinta kobcidda dhaqaalihiisa, iyo waxyeeliddiisa xasilloonidiisa iyo nabadgalyadiisa, iyo faafinta quusashada iyo baaska iyo niyadjabka oo lagu faafinayo dadka naftooda guud ahaan iyo dhalinyarada gaar ahaan, wuxuu ku magacaabay Quraanka kariimka murjifiin waxaa laga wadaa irjaafka in la dhex tiimbado

wararka xunxun iyo fidnooyinka, kuwaasoo u keenaya bulshada qas daran, wuxuu yiri Alle:

{لَئِنْ لَمْ يَنْتَهِ الْمُنَافِقُونَ وَالَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ وَالْمُرْجِفُونَ فِي الْمَدِينَةِ لَنُغْرِيَنَّكَ بِهِمْ ثُمَّ لَا يُجَاوِرُونَكَ فِيهَا إِلَّا قَلِيلًا}.

(**Haddayna ka joogin munaafiqiintu iyo kuwa qalbiga ka buka iyo kuwa gilgili (beenta ku faafin) Madiina waanu kugu diri kulamana darsayaan wax yar mooyee**).

Kutirikuteenka waa qaab ka mid ah qaababka dagaalka oo nabiga xataa aan ka badbaadin, mushrikiinta waxay kula dagaallameen nabiga kutirikuteen si ay u halleeyaan dacwadiisa iyo sumcaddiisa, waxay dadka ku dhex faafiyeen been oo ah inuu yahay sixiroole, wuxuu yiri Alle:

{وَقَالَ الْكَافِرُونَ هَذَا سَاحِرٌ كَذَّابٌ}

(**Waxayna dhaheen gaaladii kani waa sixirroow beenaale ah**)

Si masabidaad ah waxay u sheegteen inuu yahay gabyaa oo waalan, wuxuu yiri Alle:

{وَيَقُولُونَ أَئِنَّا لَتَارِكُو آلِهَتِنَا لِشَاعِرٍ مَجْنُونٍ}

(**Oo dhaha ma waxaan uga tagaynaa ilaahyadannada gabayaa waalan**)

Mar waxay faafiyeen inuu yahay kitaabgaablow Alle ayaa beentooda iyo masabidaaddooda ka jawaabay asoo leh:

{إِنَّهُ لَقَوْلُ رَسُولٍ كَرِيمٍ * وَمَا هُوَ بِقَوْلِ شَاعِرٍ قَلِيلًا مَا تُؤْمِنُونَ * وَلَا بِقَوْلِ كَاهِنٍ قَلِيلًا مَا تَذَكَّرُونَ * تَنْزِيلٌ مِنْ رَبِّ الْعَالَمِينَ}.

(**Qur'aanku waa hadalkii Alle uu u soo dhiibay Rasuul sharaf leh * Hadal gabayaana ma aha, wax yar ayaad rumaynaysaan (xaqa) * Hadal wax sheegana ma aha wax yar ayaad waantoomaysaan * (Qur'aanku) wuxuu ka soo degay Allaha Caalamka**.)

Maalinta Uxud mushrikiinta waxay faafiyeen in nabiga la dilay iyadoo ay ka tahay inay muslimiinta kala geeyaan awooddoodana daciifiyaan, muslimiinta ayaa isku yaacay wayna niyadjabeen qaarkoodi ayaa cararay qaarna hubka ayay tuureen, qaarna nabiga ayay garab istaageen.

Maalinta Xamraa Al-asad mushrikiinta waxay faafiyeen in Qureysh ciidan badan ay u diyaarisay weeraridda Madiina iyo la dagaallanka nabiga iyo asxaabtiisa, laakin muslimiinta diintooda ayay ku sugnaadeen, kutirikuteenka waxba kama tarin, Ilaahay wuxuu ku amaanay oraahdiisa:

{الَّذِينَ قَالَ لَهُمُ النَّاسُ إِنَّ النَّاسَ قَدْ جَمَعُوا لَكُمْ فَاخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَانًا وَقَالُوا حَسْبُنَا اللَّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ * فَانْقَلَبُوا بِنِعْمَةٍ مِنَ اللَّهِ وَفَضْلٍ لَمْ يَمْسَسْهُمْ سُوءٌ وَاتَّبَعُوا رِضْوَانَ اللَّهِ وَاللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَظِيمٍ}.

(**Ee ah kuwaa ay ku dhaheen dadku dadkii baa idiin kulmay ee ka cabsada oo u siyaadiyey rumeyn, oy dhaheen kaafiyahanagu waa Ilaahay isagaana u fiican wakiil * Oo la noqday nicmo Alle iyo fadli oyna taaban xumaan raacayna raalli ahaanshaha Alle, Ilaahayna waa fadli wayn lahaade**).

Maalinta Xuneyn marka la faafiyay in nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - la dilay, nabiga wuxuu ka hortagay kutirikuteenkan asoo leh:

**(أنا النَّبيُّ لا كَذِب ، أنا ابْنُ عَبْدِ المُطَّلب)**

(**Anigaa nabiga ah beenna ma aha, anigaa ah ina Cabdilmudalib**)

ku celcelinta kutirikuteenka iyo in la faafiyo halista ku jirta dadka wax garadka kama qorsoona, taas oo ah bannaysashada dhiigga iyo cirdiga iyo qalalaasaha, Waxaa inooga sugan dilka Khaliifaha raashidka Cusmaan bin Cafaan –Ilaahay raalli haka noqdee - daliilka ugu fiican, mujrimiinta way go'doomiyeen kutirikuteen dartii uu faafiyay Cabdullaahi bin Saba' oo Yahuudi ahaa, bal waxay u diideen inuu cabbo biyo isagoona ah qofkii ceelka Ruuma hantidiisa ku iibiyay, Waxaa laga wariyay Naa'ila xaaska Cusmaan waxay tiri: maalinta la dilay Cusmaan wuu soomanaa, marka afurka la gaaray wuxuu weyddiistay biyo macaan, maysan siinin wuu hurday mana afurin, marka la gaaray hiraabtii waxaan u tagay dumar aan deris nahay biyo macaan ayaan weyddiiyay,

waxay i siiyeen jalmad biyo, waan u imid waan dhaqaajiyay wuu soo toosay waxaan iri: waa biyo macaan madaxiisa ayuu kor u qaaday, wuxuu eegay fajarka wuxuu yiri: aniga waan soomay, rasuulka Alle ayaa iga soo fiiriyay saqafkan asoo biyo macaan wado wuxuu yiri: (**cab Cusmaanow**), waan cabbay ilaa aan ka dhergo, kaddib wuxuu yiri: (**ku darso**), waan cabbay ilaa aan ka dhergo, kaddib wuxuu yiri: (**dadka way kugu soo badanayaan haddaad la dagaallanto waad ka guulaysanaysaa, haddii aad iska dhaafto agteena ayaad ku afureysaa**), maalintaas ayay usoo galeen wayna dileen).

Waqtigeena xaadirka ah wax badan ayaa isbaddalay, shaqadan xun waxay yeelatay qaabab kala duwan iyo siyaabo kala nooc ah, taasna waxaa ugu wacan hormarka weyn ee caalamka oo degdegga ah xagga isla xiriirka iyo tignaloojiyada, kutirikuteenka ayaa noqday mid dhaqsi ku faafo oo saameyn weyn leh, bal wuxuu noqday qaab ka mid ah qaababka dagaalka,

dagaalka kuma eka hal dhinac, dagaalka mid militari ma aha ama sirdoon kaliya marka loo eego qaabkii hore, qaababkiisa way hormareen, xagga adeegsiga hubka kutirikuteenka iyo habaabinta wacyiga, kaasoo noqday mid la barto oo laysku tababbaro xagga jihooyinka shakiga leh, waxaa la shaqo galinayaa guutooyinka elegtarooniga ah iyadoo la adeegsanayo cunaqabateen

xagga siyaasadda iyo dhaqaalaha iyo maskaxda iyo iskudayidda ugu dambeysay kicinta dadweynaha iyo in lagu diro madaxdooda iyo in la xumeeyo madaxda wadaniyiinta iyo shaki in la geliyo waxqabadyada oo dhan iyo in la yareeyo arrinkooda, iyo isbahaysiga kooxaha argagixisada iyo in laysku dayo dhexgalidda mu'sasooyinka iyo in la kiciyo arrimo keenaya kalatag oo ku salaysan hab la darsay oo aan wali dhicin, iyadoo arrinka si fiican loo daraaseeyay qaar baraha bulshadana la shaqagaliyay, bal in badan iyaga ka mid ah, iyo in lagusoo gabbado baahida hadda jirto oo dadka qaarkii aan ku sabri karin, iyo in laysku dayo jabinta rabitaanka dadweynaha iyo in laga shaqeeyo jabinta haybadda madaxda iyo in la shaki galiyo culimada iyo mufakiriinta iyo musaqafiinta oo wadaniyiinta ah iyo in la taageero cadowgooda iyo in loo diro gooddi mar si qarsoon marna si cad kuwa haysta mabda'ooda oo daacaadka u ah dalkooda, in loogu goooddiyo muujinta meesha uu marayo qofkaan iyaga la soconin oo aan ku biirin qorshaha xun oo aan u hoggaansamin aanna u rukuucin oo dadka ka dambeeyana aan rukuucsiinin.

Waxaan shaki ku jirin in ka hortagidda dhammaan hirarkan daran ay u baahan tahay caqiido iimaan iyo wadaninimo adag, iyo kalsooni Alle aan xad lahayn, Maxaayeelay dad badan ayaa waxaa laga yaabaa inay fududeystaan inay dadka la wadaagaan wararka

qaarkooda ama tirakoobyada ama sheekooyinka iyagoon hubsanin ama aan ogaanin meesha laga keenay, wuxuu ka mid noqonayaa qof faafinayo fidno, immisa erey oo been ah aan sal lahayn uu addoonka dhahayo ama uu qorayo ama uu dadka la wadaagayo oo gaaraya meel kasta, sabab waxay ugu noqonaysaa kuwaas cadaabkiisa maalinta Qiyaame, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**( إِنَّ العَبْدَ لَيَتَكَلَّمُ بِالكَلِمَةِ مِنْ رِضْوَانِ اللَّهِ ، لاَ يُلْقِي لَهَا بَالًا ، يَرْفَعُهُ اللَّهُ بِهَا دَرَجَاتٍ ، وَإِنَّ العَبْدَ لَيَتَكَلَّمُ بِالكَلِمَةِ مِنْ سَخَطِ اللَّهِ ، لاَ يُلْقِي لَهَا بَالًا، يَهْوِي بِهَا فِي جَهَنَّمَ )**

(**Addoonka wuxuu ku hadlayaa erey oo ka mid ah raalliga Alle asoon ka war haynin Ilaahayna darajooyinka uyuu ugu kordhinayaa, addoonka wuxuu ku hadlayaa erey ka mid ah carada Ilaahay asoon ka war haynin, naarta Jahannamo ayuu ugu dhacayaa) (Saxiix Albukhaari**).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Islaamka wuxuu u dejiyay manhaj xigmad leh sidii looga ilaalin lahaa bulshada kutirikuteenka, waxaa ugu muhimsan:

* in loo baahan yahay hubsashada wararka intaan lagu faafinin bulshada wuxuu yiri Alle:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبَإٍ فَتَبَيَّنُوا أَنْ تُصِيبُوا قَوْمًا بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَى مَا فَعَلْتُمْ نَادِمِينَ}

(**Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad ka shallaydaan waxaad fasheen**), wuxuu yiri rasuulka:

**(التَّأَنِّي مِنَ اللهِ ، وَالْعَجَلَةُ مِنَ الشَّيْطَانِ)**

(**Deganaanta waa xagga Alle degdegana waa xagga shaydaanka**), wuxuu yiri rasuulka:

**(التُّؤَدَةُ فِي كُلِّ شَيْءٍ إِلَّا فِي عَمَلِ الْآخِرَةِ) .**

(**Xasilloonida meel kaste ayay ku jirtaa camalka aakhira mooyee**)

* inaan lagu celcelinin kutirikuteenka si kaste ha noqdo mid la akhrisanayo ama mid la dhegeysanayo ama mid la daawanayo, maxaayeelayay ku celcelinta waa ka qaybgal laga qaybgalayo faafinta kutirikuteenka, wuxuuna ku faafaa marka la helo carrab ku celcelinayo iyo dhego maqlayo iyo naf qaadanayso oo rumeysanayso, wuxuu yiri Alle:

(إِذْ تَلَقَّوْنَهُ بِأَلْسِنَتِكُمْ وَتَقُولُونَ بِأَفْوَاهِكُمْ مَا لَيْسَ لَكُمْ بِهِ عِلْمٌ وَتَحْسَبُونَهُ هَيِّنًا وَهُوَ عِنْدَ اللَّهِ عَظِيمٌ)

(**Markaad kula kulmaysaan qadafka carrabkiinna oo aad ku dhahaysaan afkiinna waxaydaan ogayn, una malaynaysaan wax fudud isagoo Alle agtiisa ku wayn**)

Wuxuu leeyahay rasuulka:

**(مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلاَ يُؤْذِ جَارَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا أَوْ لِيَصْمُتْ)**

(**Qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro yuuna dhibin deriskiisa , qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakkhiro martidiisa ha karaameeyo, qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro wanaag ha sheego ama ha iska ammuso**).

in loo baahan yahay inay bulshada is haysato oo hal dal ka dhexeeyo, marka la maqlo kutirikuteenka in malo wanaagsan lala yimaado inaan lagu degdegin tuhun, wuxuu yiri Alle:

{لَوْلَا إِذْ سَمِعْتُمُوهُ ظَنَّ الْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بِأَنْفُسِهِمْ خَيْرًا وَقَالُوا هَذَا إِفْكٌ مُبِينٌ}

**(Maxaydaan markaad maqasheen xaalka (qadafka) ayna ugu malayn mu'miniinta ragga iyo haweenka naftooda khayr, oyna u dhihin kaasi waa been abuur cad)**

Muslinka waxaa la faray inuu malada fiicneeyo inuu wanaag ku xambaaro waxa kasoo fulaya dadka kale, waayo malada xun waa jirro daran oo nolosha qasaysa, oo ku faafinaysa doodda dadka dhexdooda, nabiga wuu nooga digay arrinkaas markuu yiri:

**(إِيَّاكُمْ وَالظَّنَّ، فَإِنَّ الظَّنَّ أَكْذَبُ الحَدِيثِ، وَلاَ تَحَسَّسُوا ، وَلاَ تَجَسَّسُوا ، وَلاَ تَحَاسَدُوا ، وَلاَ تَدَابَرُوا، وَلاَ تَبَاغَضُوا، وَكُونُوا عِبَادَ اللَّهِ إِخْوَانًا)**

(**Iska jira malada, malada waa warka ugu beenta badan, ha baarbaarina hana jaajuusina hana is xasdina hana isu jeedinina babada hana is nicina, noqda addoomaha Ilaahay oo walaalo ah**)

* in la kaalmeysto dadka khibrada iyo takhasuska u leh caddeynta xaqiiqada, inaan lagu degdegin xukunka,

wuxuu yiri Alle markuu sifada munaafuqiinta caddeynayay:

{وَإِذَا جَاءَهُمْ أَمْرٌ مِنَ الْأَمْنِ أَوِ الْخَوْفِ أَذَاعُوا بِهِ وَلَوْ رَدُّوهُ إِلَى الرَّسُولِ وَإِلَى أُولِي الْأَمْرِ مِنْهُمْ لَعَلِمَهُ الَّذِينَ يَسْتَنْبِطُونَهُ مِنْهُمْ وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ لَاتَّبَعْتُمُ الشَّيْطَانَ إِلَّا قَلِيلًا }

(**Markuu u yimaaddo amar nabadgalyo ah ama cabsi way faafiyaan hadday u celiyaan xagga rasuulka ama kuwa cilmiga leh oo ka mid ah waxaa ogaan lahaa kuwa la soo baxa (dhabta) oo ka mid ah, hadduusan jirin fadliga Ilaahay korkiinna ah iyo naxariistiisa waad raaci lahaydeen shaydaan wax yar mooyee**), taasoo laga wado: inay gaadayeen amaanka iyo xasilloonida bulshada Madiina, markay maqlaan wararka la xiriira amniga muslimiinta iyo cabsidooda way faafiyaan ama waxay u muujiyaan iyagoo ula jeedo faafinta argagax iyo walwal iyo qalalaaso.

Qofkasoo mu'min ah ha kaco oo diintiisa qiiro u haya, oo dalkiisa daacad u ah, siduu uga hortgi lahaa kutirikuteenkaas una beenin lahaa:

wuxuu yiri rasuulka:

**(مَنْ رَدَّ عَنْ عِرْضِ أَخِيهِ رَدَّ اللهُ عَنْ وَجْهِهِ النَّارَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ)،**

(**Qofka waalaalkiisa sharftiisa difaaco Ilaahay wejigiisa naarta ayuu ka reebayaa maalinta qiyaame**).

Aan ogaano kalmadda waa amaano Alle hortiisa ayaa lagu weyddiinayaa maalinta qiyaame.

dhammaanteena waa inaan ogaanaa in cadowgeena ay ka dhigteen waddo dagaalka jiilka afaraad iyo jiilka shanaad iyo dagaallada kutirikuteenka iyo foolxumeynta waxqabadka iyo dadka wadaniga iyo inay waxyeeleeyaan wax kastoo wadani ah, inay fashiliyaan dowladaheena ama ay ridaan ama ay burburiyaan siday danahooda u xaqiiyaan waxaa lanaga rabaa inaan ogaano inaan ku jirno dagaal adag oo laynoo maleegayo, kutirikuteenkana waa shidaalkiisa, waxaa waajib nagu ah inaan hubsano si aanan ugu dhicin dhagarta cadowgeena, waxaa waajib ah inaan ku kalsoonaano nafteena iyo madaxdeena iyo ciidankeena iyo nabadsugiddeena, inaanan maqlin kuwa dalka cadowga ku ah, iyo kuwa ka shaqeeya inay dhib na gaarsiiyaan ama dareenkeena ama ka fikiraya inay nagu ridaan niyadjab iyo quusasho, taas waxay inaga rabtaa barbaarteena iyo bulshadeena inaan kaga ilaalino fahanka waaqaca, inay ogaadaan waxa na hortaagan intuu la eg yahay oyna isku dayaan ka qaybqaadashada xallintiisa

**Ilaahayow akhlaaqdeena hagaaji, dalkeenana noo ilaali, wixii aad jeceshay ood raalli ka tahayna na waafaji, dalalka islaankana ka ilaali waxkastoo xun.**